
TAAGEERIDDA XOOJINTA QORSHAYNTA
ISBEDDELKA CIMILADA EE MASHRUUCA SOOMOOLIYA

# Aqoonta Qabashada iyo Ka Faa'idasyiga Biyaha Roobka



Ministry of Environment and Climate Change
وزارة البيئة والتغير المناخي

UNDP

GREEN CLIMATE FUND

KAALO Aid and Development Org

JAAMACADDA CAMUUD AMOUD UNIVERSITY

PUNTLAND STATE UNIVERSITY

SIMAD UNIVERSITY

# QABASHADA IYO KA FAA'IIDASYIGA BIYAHA ROOBKA.

## *01. Hordhac: Qabashada Biyaha Roobka Iyo Maarayntooda.*

Qabashada biyaha roobka waxa laga wadaa in si dabiici ah ah loo kaydiyo, loona weeleeyo biyaha roobka ee wabiyada iyo kuwa togagga qulqulaya; si bulshadu u hesho biya ku filan.

**Qabashada Biyaha Roobka:**

Qabashada biyaha roobka waxa loola jeeda in biyaha roobka laga soo qabto guryaha dushooda, intaa kadibna loo sameeyo meelo ay ku kaydsami karaaan.

Soomaaliya biyaha roobku waxa ay qulqulaan guryaha korkooda iyo dhulka guudkiisa. Bulshada Soomaaliyeed si ay biyaha roobka uga faa'iidaystaan waxa ay isticmaalaan weelal balaastik ah, berkado, iyo biyo xireenno. Haddaba, biyaha la kaydiyey bulshadu waxa ay isticmalaan xilliyada abaartu jiro ee jilaalka ah, waxa ayna uga faa'iidaystaan in ay xoolahooda iyo beeraha ku waraabsadaan.

Marka laga hadlayo kafaa'iidaysiga biyaha roobka, waxa kamid ah nidaam ay ciiddu biyaha roobka haynayso, taas oo lagu magacaabo (biyaha cagaaran). Abaaraha iyo jilaallada jira awgood, qabashada biyaha roobku Soomaaliya waa u muhiim; maxaa yeelay, waxa ka faa'iidaysanaya xooladhaqatada iyo beeralayda ku nool baadiyaha iyo tuulooyinka. Marka magaalooyinka la joogo, biyaha roobka ee lagu kaydiyo baraaguhu, waxa ay leeyihiin muhiimad gaar ah; maxaa yeelay, biyaha roobku waa nadiif oo malaha cusbo iyo qashin kale. Waxa kale oo muhiim ah, hirgelinta nidaamyada casriga ah ee waraabka beeraha, dhowridda carraguurka ee uu sababo roobku, siiba biyaha ka soo dhaca oogooyinka ama meelaha sare. Sida oo kale, nidaamka qabashada iyo kaydinta biyaha roobku waxa ay qayb ka tahay badqabka dadka iyo duunyada, iyo kor u qaadidda wax-soosarka beeraha iyo in xooluhu helaan baad iyo daaq iyo biyo ku filan.

Intaas marka lagu daro laqabsiga cimilladda is beddelaysa iyo barashada aqoonta iyo xirfadda qabashada iyo kaydinta biyaha roobka ku saabsan, waxa yaraaynaysa ama meesha ka baxaysa biyo yarida iyo jilaalka, taas oo bulshada siinaysa nolol wanaagsan.

**Xogta Roobka ee Soomaaliya**

10-kii sannadood ee ugu danbaysay, Soomaaliaya waxay la kulantay isbeddello ku yimi roobki da'i jirey. Celcelis ahaan roobka Soomaaliya ka da'ay waxa uu u dhexeeyay 200mm ilaa 600mm. Labada xilli roobaad ee soomaaliya ugu weyn waa guga oo bilowda bisha afraad ilaa bisha lixaad, iyo xilliga labaad oo ah dayrta oo iyana ku aaddan bisha tobnaad ilaa bisha laba iyo-tobnaad. Haddaba, labada xilli roobaad, roobka ugu badan waxa la helaa xilliga guga. Deegaannada xeebaha iyo gobollada waqooyi ee Soomaaliya ayaa la ogaaday in ugu roob badan yihiin, marka la barbardhigo bartamaha iyo koonfurta Soomaliya (SWALISM, 2023). Haddaba biya yarida iyo roob la'aanta, ama kaladuwaanta roobka ee deegaammadu waxa muhiim u tahay nidaamka qabashada iyo kaydinta biyaha roobka. Biyaha roobku marka laga yimaado in ay nadiif yihiin, waxa ay asaas u yihiin wax-soosarka dalagga iyo dhaqashada xoolaha, taas oo keenaysa in sugnaan cunto oo waarta la helo. Haddaba waxa soo jeedin mudan in laga faa'iidaysto biyaha roobka ee xilliga guga, bulshaduna ay u diyaar garoobaan oo ay samaystaan qalabkii iyo weelkii ay ku qabsan lahayeen biyaha roobka.

Gabagabadii, kafaa'iidaysiga biyaha roobku waxa ay xal u helid u tahay in biya yarida jirta laga baxo. Sida oo kale, waxa ay xoojinaysaa in bulshadu miyi iyo magaalaba u jihaystaan dhinaca horumarka wanaagsan iyo wax-soosarka dalka.

**I. Sida ugu habboon ee loo isticmaalo loona qabto biyaha roobka:** Dalka Soomaaliya waa dal cimilo qallalyl ah leh. Roobka ku da'a Soomaaliya ma aha mid xooggan oo leh dhibco waraabin kara dalagga iyo xoolaha, isla mar ahaantaana dadku aysan isticmali karin. Haddaba nidaamka kaydsashada biyaha ee ay kamid tahay qabashada biyaha guryaha korkooda ka soo dareera ama majaroorka lagu qabto, waxa ay kor u qaadi karaan in xilliga jilaalka biyo la helo. Hirgelinta dhowridda iyo isticmalka wanaagsan ee biyaha iyo in aan la khasaarin waa arrin muhiim ah.

**II. Isticmaalka biyaha kaydsan ee dahsoon:** Biyaha ku kaydsan ciidda waxa lagu tilmaamaa kayd dabiici ah. Xaddiga biyaha laga heli karo ciidda waxa ay ku xiran tahay nooca ciidda iyo nooca xididka ee dalagga. Sida oo kale, waa in aan maanka ku haynnaa in biyaha ciidda ku jira ay muhiim yihiin, waana in lagu daboolo ama lagu dahaaro caleemo. Tani waxa ay yaraysaa in biyuhu ciidda ka qulqulaan ama uumi baxaan. Waxa kale oo ay so keenaan qoyaan iyo rays.

**III. Qabashada biyaha ee ugu habboon iyo moosaska dusha sare:** Qabashada biyaha ee dhulka duushiisa u isticmaal walxo aan sun ahayn oo nadiif ah, sida: kuwa laga sameeyey macdanta, marmarka ama walxo kale oo aan biyaha la qabtay dhibaato ku keenayn. Biyaha dhulka ordaya iyagu dadaal dheeri ah ayay rabaan; si loo yareeyo bacaadka; maxaa yeelay in bacaad ku samayso dhulka waxay yareenaysaa awoodda kaydadka biyaha sida dhaamka. Dhaamka biyaha qabta iyo faraha ciidda laga sameeyo waa mid kamid ah tabaha lagu yareeyo dhibaatada bacaadka. Marka aad looga war hayo lana dayactiro waxa ay dhalisaa kayd sare iyo biyo qabad wanaagsan. Sida oo kale, xoolaha waa in laga ilaaliyo kaydadka biyaha, taasi ma aha oo kale in xoolaha laga ilaaliyo in ay biyaha ku dhintaan, balse waxa ay qayb ka tahay badqabka biyaha laftooda; si loo helo biyo cafimaad qaba.

**IV. Yaraynta biyaha dhulk dushiisa ka uumi baxaya:** Joogtaynta in dabool ama dahaar lagu sameeyo dhulka qoyan waxa ay yaraysaa in biyuhu khasaraan oo guraan. Intaa kasow, dhisidda dugsi ama dugaal dhaamamka dabaysha ka ilaaliya waxa ay yaraysaa uumi baxa biyaha dhulka dushiisa fadhiya. Dhirta lagu hareeraha dhaamamka marka laga yimaaddo in ay rayska qabato, waxa kale oo ay keentaa qabaw, taas oo meesha ka saarta in ay biyuhu uumi baxaan. Sida oo kale, isticmalka ciidda qoyan oo lagu daboolo beerta qayb weyn ayay ka qaadataa haynta qoyaanka rayska ciidda. Waraabka tifqaanka ah iyo waabka beerta xilliga habeenkii waxa ay yareeyaan biyaha uumi baxa ee khasaarooba.

**V. Feejignaan u yeelo cararka biyaha:** Biyaha cararaya wa kuwa aanay ciiddu qaban karayn, kuwaas oo dul carara dhulka dallagu ku abuuranyahay. Qaab-dhismeedyada uu kamid yahay (contour schemes, terracing, pits and bunds), waxa ay yareeyaan cararka biyaha. Dhulku in uu jabad dhir ah leeyahay waxa ay yareeyaan cararka biyaha qulqulaya dhulka dushiisa.

**VI. Qorshaha waraabinta xilliga guridda dalagga:** Qiimaynta baahida biyaha iyada oo la xisaabinayo biyaha ay dhirta, xoolaha, iyo dadku u baahanyihiin, iyo inta goor ay rabaan. Samayso jadwal waraab oo ku jaan-go'an  baahida waraab ee dalagga iyo xoolaha. Tusaale ahaan, dalaggu wa ku kaladuwan yahay xaddiga biyaha ee qayb ka qaadanaysa waraabka. Sida si lamid ah,  xooluhu isku baahi ma aha marka ay timaado ka qadidda biyaha.





Figure I: An Overview of the Types of Rainwater Harvesting Storage Systems

- Taangiyo dhulka korkiisa ku yaal
- Taangiyo dhulka hoostiisa ku yaal
- Dhaamam iyo xurfooyin (godad).

- Earth dams (Dhaam dhulka hoostiisa laga qoday)
- Small weirs (Biyo xireenno yaryar)
- Subsurface dams (Biyo xireenno)
- Sand dams, (xurfo ciideed)
- Rock catchments (Biyo qabatin dhadhaab ka samaysan)
- RWH for recharging ground water (Biyo qabatinka roobka si dhulka biyo badan u galaan)



Jaantuska II: Biyo Xireenka Dhulka



Jaantuska III: Haanta Kaydka Biyaha ee Roobka

- Kharaskha: Qabashada biyaha roobku waxay ubaahantahay kayd ubaahan naqshadayn iyo dadka aqoonteedii iyo khibaradeedi leh taasina waxay ka dhigtay qaali.

- Uuumi bax badan: Uuumi baxa badan oo ay sababayso qoraxdu wuxuu saamayn ku yeelanayaa kaydintii biyaha weliba taangiyadda & warooyinka korka ka furan.

- Awoodda farsamadda ee la xiriirta qabashada biyaha roobka ee shaqaalaha iyo farsamayaqaanada oo xadidan

- Wacyi gali la'aan iyo aqoon la'aan la xiriirta qabashada biyaha roobka oo yar.

- Colaadaha iyo nabad-gelyo-darrada joogtada ah ee ka jirta gobollada Soomaaliya qaarkood ayaa laga yaabaa inay carqaladeeyaan dadaallada lagu hirgelinayo laguna ilaalinayo habka goosashada biyaha roobka.

**Talasoojeedin ku socota siyaasad-dajjiyaasha iyo bulshada**

- Dawladdu wa in ay samaysaa wacyigelin iyo ol'ole la xiriira kafaai'idaysiga biyaha roobka; si bulshada loo baro farsamada iyo muhiimadda qabsashada biyaha roobka.
- Dawladdu waa in ay dhaqaale ugu talagashaa; si loo sameeyo cilmibaarisyo la xiriira qaabka ugu wanaagsan ee looga faa'iidaysan karo biya-qabasahda.
- Waa in la dhiirrigrliyaa aqoonta soojireenka (waddaniga) ah ee la xiriirta kafaa'iidaysiga biyaha roobka.
- Bulshooyinku waa in ay abuuraan dadaallo sanduuq kayd ah ama dhaqaale yar; si ay u maalgeliyaan dhismaha iyo dayactirka kaabayaasha qabasahda biyaha roobka.

**Tixraac:**

Somali Water and Land Information Management (SWALIM). (2023). Annual Rainfall.
Retrieved from https://www.swalim.org/annual-rainfall

TAAGEERIDDA XOOJINTA QORSHAYNTA
ISBEDDELKA CIMILADA EE MASHRUUCA SOOMOOLIYA

# Aqoonta Qabashada iyo Ka Faa'idasyiga Biyaha Roobka